

_____ qabanqaabinayaa _____ shaqo-maalmeedka wax soo uruurinta ee UNICEF (taksvärkin, iskaa wax u qabso), taasoo ay ardaydu samayn doonaan shaqo-maalmeed loogu talagalay arrimaha xuquuqda carruurta iyo dhalinyarada.

Shaqo-maalmeedka wax soo uruurinta waa dhaqan iyo caado soo jireen ah oo muddo dheer ka jirtay dalkaan Finland, waana habdhaqan wanaagsan oo ururrada iyo iskuulladuba ay si wadajir ah uga shaqaynayaan sidii adduunka wanaag loo gaarsiin lahaa.

Ardaydu iyaga ayaa go'aansanaaya halka ay shaqada ka dalbanayaan – shaqobixiyuhu wuxuu noqon karaa qof kasta oo qaangaar ah. Meelaha aadka loogu jecel yahay waxaa ka mid ah tusaale ahaan dukaamada raashinka iibiya iyo kafeteeriyayaasha (makhaayadaha kafeega). Qaar ka mid ah ka qaybqaadayaasha shaqadaan waxaa ay ka shaqaynayaan guriga iyo deriskaba, tusaale ahaan ka shaqaynta ardaaga guriga iyo dhaqista daaqaadaha. Taageeradaa waxaa si wadajir ah loo siin karaa saaxiibbada, tusaale ahaan ururrada isboortiga ee xaafadlaha ah. Shaqo-maalmeedka waxaa tusaale ahaan lagu samayn karaa in la midabeeyo oo la sawiro, islamarkaana la iibiyo farshaxanka aad adigu samaysay.

Maalinka shaqada wax uruurinta waxaa ay ardaydu haystaan fursad ay ku soo arki karaan shaqada iyo nooca ay tahay, taasoo ah midda uu isagu xiisaynaayo. **Qofka shaqobixiyaha ah waxaa uu helayaa gacan caawisa muddo hal maalin ah, islamarkaana waxaa uu qofka dhalinyarada ah siinayaa khibraddiisa shaqo ee qaalgiga ah.** Qaar ka mid ah shaqobixiyayaashu waxaa ay heleen qof shaqaale ah oo sidiisoo kale howsha si fiican u yaaqaanna, oo u shaqeeya xagaaga ku soo fool leh. Shaqaalaysiinta halka maalin ah waxaa uu shaqobixiyuhu ka caawinayaa qofka dhalinyarada ah sidii uu qaab gudaha iyo mid caalami ahba ugu shaqayn lahaa, waxna uu ugu baran lahaa.

Dhalinyarada ka shaqaynaysa shaqo-maalmeedka wax uruurinta ee UNICEF, waxaa la geliyay caymiska shirkadda If. Shaqobixiyaha lagama rabo in uu mushaarka shaqo-maalmeedka ka bixiyo lacagta canshuurta iyo kharashka daryeelka arimaha bulshada.

Maalka ama hantida laga helo shaqo-maalmeedka wax uruurinta waxaa lagu tababarayaa macallimiinta, waxaa lagu soo iibinayaa qalabka waxbarashada iskuulka, waxaana lagu horumarinayaa ka qaybqaadashada carruurta ee go'aannada iskuulku uu gaaraayo. UNICEF waxaa ay u shaqaynaysaa si dhabaradayg ama adkaysi leh, iyadoo ka khabiiir ahaanna saamayn ku yeelanaysa dadka go'aan gaarayaasha ah, si iskuul walba uu ardayda ugu noqdo mid tayo wanaagsan oo ammaan ah.

Nagala soo qaybgal sidii aan ku hirgalin lahayn xuquuqda carruurta!

Naga gudooma salaan diirran,
Shaqaalaha iskuulka iyo UNICEF

Shaqo-maalmeedka wax uruurinta ah oo la soo koobay

- Inta aan howshu bilaaban waxaa ay ardaydu raadsan doonaan meel ay hal maalin ka soo shaqeeyaan.
- Waxaana uu ardaygu samayn doonaa shaqada maalinkaas lagu balamay, wuxuuna shaqobixiyaha u dhiibayaa foomka shaqada, kaasoo ay ku qoran tahay dhammaanba



Daawo fiidiyowgaan ka sheekeynaaya gabadha la yiraahdo Xaliima ee 12 sano jirka ah, taasoo iskuulkii dib ugu laabatay: www.unicef.fi/halima

macluumaadka loo baahan yahay ee ku saabsan mushaar bixinta.

- Shaqada kaddib, shaqobixiyaha ayaa wuxuu bixinayaa mushaarkii lagu heshiiyay , isagoo ku bixinaaya sida ku xusan hagista arrinkaa ku sabsan, wuxuuna si toos ah ugu shubayaa ururuka UNICEf ama wuxuu iyadoo caddaan ama kaash ah siinayaa ardayga si uu iskuulka ugu geeyo. Qiimaha lacagta mushaar ahaanta ee la soo jeediyay waa 20 €.

Macluumaad dheeraad ah: www.unicef.fi/paivatyokerays

Macluumaadka ku saabsan oggolaanshaha lacag uruurinta: Finland UNICEF/Maamulka booliska ee oggolaanshaha lacag uruurinta RA/2018/1240 mudada 2019-2020 dalka oo dhan. UNICEF waxaa ay lacagtaas ku caawin doontaa carruurta dalka Malaawi 2019-2020. macluumaad dheeraad ah waxaad ka heleysaa www.unicef.fi/kerayslupa.